

Haddii adigu aad doonaysid inaad la wadaagto macluumaadkaaga bixiyeyaasha daryeelka caafimaad iyagoo isticmaalaya HealthInfoNet, adigu uma baahnid wax aad ku samayso foomkani.

Waa maxay HealthInfoNet ? HealthInfoNet waa nidaam ammaan ah oo kombiyuutarka ah kaas oo isu keenaya macluumaadkaaga caafimaad ee goobaha caafimaad bixiyeyaashaa ee kala duwan kana dhigaya kayd caafimaad oo elektroonig oo kali ah. Waxaana ku jira macluumaad khuseeya daawooyinkaaga, xasaasiyada, natiijooyinka baadhitaanada, iyo in badan oo kale. Inaad haysato macluumaadkani waxay ka caawin kartaa caafimaad bixiyayaashaada inay sameeyaan go'aano wanaagsan oo ku saabsan daryeelkaaga. Waxay sidoo kale kaa caawin kartaa sidii looga hortagi lahaa qaladaadka, gaar ahaan xilliyada xaaladda degdega ah.

Ma yihiin kaydalkaygu mid ii gaar ah ammaan ah?

HealthInfoNet way qariysay si aan la fahmaynin dhamaan macluumaadka waxayna dabadeed u dirtaa xidhiidhyo koombuyuutar oo ammaan ah. Kaliya dadka ku lug leh daryeelkaaga ayuun baa eegi kara macluumaadkaaga. Si aad u ogaato qofka eegay kaydkaaga iyo markii ay eegeenba, waxaad boqotaa www.hinfonet.org/audit. Dabcan, ma jiro nidaam dhamaantii ammaan ah, laakiinse HealthInfoNet waxay samaysay dadaal kasta oo ay ku illaalin karto ammaanka kaydadaaga.

Waa maxay macnaha "iska-dayntu"?

Haddii aanad doonayn in macluumaadka caafimaadkaaga lagu kaydiyo HealthInfoNet, waxaad buuxisaa foomkani "iska-daynta", amma 'in aan la wadaagin macluumaadka caafimaadkaaga. Doorashada in lagaa reebo wadaagista macluumaadkani, ma saamayn doonto helitaankaaga daryeelka caafimaad. Haddii adigu mar danbe aad go'aansatid in aad yeelato kaydka HealthInfoNet, waxaad u baahan tahay in aad soo wacdid HealthInfoNet amma in aad buuxisid foomka "doorashada" ee bogga internaytka ee ah www.hinfonet.org/optin.

Waxaan doortay in aanan cid la wadaagin xogtayda caafimaad
(I choose not to share my health information)

Haddii aanad doonayn kaydka diiwaagelinta HealthInfoNet, foomkan buuxi oo boosta ugu soo dir HealthInfoNet, 125 Presumpscot Street, Box 8, Portland, ME, 04103 ama fagas ugu soo dir 1-207-541-9258. Ama foomkan bogga internatka ka buuxi www.hinfonet.org/optout. Haddii aad hayso wax su'aalo ah, ka soo wac HealthInfoNet lambarkan 1-866-592-4352 ama 207-541-9250, ama iimayl ugu dir info@hinfonet.org.

Magaca hore (First Name)	Magaca Dhexe (Middle Name)	Magaca Awowga (Last Name)	
Cinwaan (Address)	Magaalo (City)	Gobolka (State)	Siib koodhka (Zip Code)
Sinji: <input type="checkbox"/> Lab (Male) <input type="checkbox"/> Dheddig (Female)	Taariikhda dhalashada: _____ / _____ / _____ (Date of Birth)	_____-_____-_____ Lamabarka Caymiska Bulshada – khasab ma aha inaad ku qorto (Social Security Number – not required)	
Telefoonka maalintii (daytime telephone)	imayl (email)		

Anoo saxeexaya, waxaan fahmay in xogtayda caafimaad aanay heli doonin adeeg bixiyaayshu iyagoo isticmaalaya HealthInfoNet, xataa xaaladda degdega ah.

By signing, I understand that my health information will not be available to providers using HealthInfoNet, even in an emergency.

Saxeexa Bukaanka ama Masuulka
(Signature of Patient or Guardian)

____ / ____ / 20 ____
Taariikhda (Date)
(bil / maalin / sanad)